



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

PD Newsletter



Kusoo Dhawaw, Dayrta.

Waa wargayska sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaana loogu talo geley in bushqada Washington ee waxbarashada hore uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormar Xirfadeed](#).



Wargeyskan...

- [Wax Ka Baddalka Tabobarka](#)
- [Taxanaha Webinarka Dayrta](#)
- [Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada](#)
- [Deeqaha Waxbarashada Early Achievers, Sheeqooyinka Guulaha](#)
- [Khayraadka COVID-19 ee Shaqaalaha ECE](#)
- [Joogto Ugu Xidhnaw](#)
- [Fariin ka socota Xogyahaha DCYF](#)

- [Coronavirus - Macluumaadkiisii Ugu Danbeeyay ee COVID-19](#)
- [Wax ra'yi ah!](#)

Wax Ka Baddalka Tabobarka

Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Tobobarka & Ikhtiyaarada Wakhtiga COVID-19



Ma waxa aad is waydiinaysaa ikhtiyaarada lagu dhamaystiran karo tobobarka inta lagu jiro safmarka COVID-19?

Waxa aad heshaa jawaabaha tobobarka DCFY inta lagu jiro COVID-19: [Macluumaadka Ugu Danbeeya ee Tobobarka & Ikhtiyaarada Wakhtiga COVID-19 \(English, español, Af-Soomaali\)](#)

Qaabka Tobobarka Bulshada Ku Salaysan

Qaabka Tobobarka Bulshada Ku Salaysan waxa uu ku siinayaa ikhtiyaar kaa caawinaya inaad la kulanto xirfadle shaqaale liisan haysta dadka u baahan shahaado hore ama gaaban.

Yoolku waxa weeye in la bixiyo dhabo tobobar oo lagu heli karo foolka-fool ama online ahaan.

Ikhtiyaarkan waa la wadaa wakhtigan oo waxaana shaqada lagu wadaa iminka [House Bill \(HB\) 2556](#).

Ma Doonaysaa Inaad Wax Badan Ogaato?



- **Akhri:** [Macluumaadka ugu danbeeyay oo dhamaystiran.](#)
- **Ka Qayb Gal Kooxda Diirasada La Saaray:** [Khamiista, Noofember 19, 2020 @ 6 galabnimo.](#) | [Khamiista, Janaayo 21, 2021 @ 6 galabnimo.](#)
- **La Soco:** Macluumaadka ugu danbeeya ee xaalada waxaa la soo gelin doonaa [websaytkaayaga](#) iyo sadexdii biloodna [Wargeyska Hormarka Xirfadaha](#).
- **Wadaag:** Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama faalooyin, la xidhiidh [Diana Stokes](#).

Fadlan ogsoonaw in dhaqan gelinta gobolka oo dhan ee qaabkan ay ku xidhan tahay maalgelinta cusub.

Balaadhinta Wakhtiga Waxbarashada



DCYF waxa ay kordhinaysaa wakhtiga waxbarashada oo ay ku daraysaa laba sano dhamaan heerarka leh waxbarashada ama u qalanka shahaadada shaqaalaha qiimaynta. Tanina waxay gaadhsiiyaysaa wakhtigan Agoosto 1, 2026.

- **Sidee ayay wax noqonaysaa hadii Shahaadada Gobolkalagu qoro kaalintayda?**
 - DCYF waxa ay kordhinaysaa wakhtiga oo ay gaadhsiiyaysaa ilaa Agoosto 1, 2026, dhamaan heerarka, waxaana kamid ah jagooyinka ku qoran Shahaadada Gobolka Waxbarashada Caruurnimada Hore (Early Childhood Education, ECE) ama wixii u dhigga (maamulaha, kaaliyaha maamulaha, kormeeraha barnaamijka).
- **Maxay tani isku badalaysaa?**
 - Isbadalkani waxa uu ka yimid cusboonaysiinta Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC) 110-300-0100 si ay uga muuqato isbadalka [House Bill \(HB\) 2556](#), iyo go'aanka hay'adu ku abuurayso joogtayn wakhtiga dhamaan jagooyinka gobolka oo dhan.

Daryeelka Ilmaha ee Aas Aasiga ah Waxaa Lagu Heleyaa Online ahaan!


Daryeelka Ilmaha Aasiga (Child Care Basics, CCB) ee online-ka waxaa laga helayaa [daaqada tobobarka DCYF](#)! CCB-ga online ah wax kharash ah kuma taagna bixiyaha. DCYF waxa ay wakhti xaadirkan la shaqaynaysaa cida gacansaarka lala leeyahay tobobarka si loo bixiyo CCB tooska ah ee onlineka ah.

Waxaa jira weli dhawr ikhtiyaar oo lagu dhamaystiranayo tobobarka CCB, oo ay ku jiraan wax ka badalka kumeel gaadhka ah COVID-19 dartiis. Si aad wax uga ogaato ikhtiyaarkan, booqo [Buuxinta CCB](#).



Si aad u hesho tobobar CCB oo dheeraad ah, isticmaal daaqada [“Find Training \(Hel Tobobar\)”](#) ee MERIT.

Macluumaadka ugu danbeeya ee Kordhinta Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality Early Learning, EQEL)



Waa maxay EQEL?

- Kordhinta Tayada Waxbarashada Hore ee EQEL, waxaa weeye tobobar 20 saacadood ah oo lagu dhamaysan karo laba sano. Sanadka 1 ee tobobarku waxa uu ka kooban yahay 10 saacadood ee ugu horeeya ee EQEL, waxaana

kamid ah mawduucyada: Nidaamka Jawaabta Dhaqanka, Dhismaha Maskaxda, Shaqada Guud iyo Jawaabta Daryeel Bixiyaha.

Sideen u heli karaa tobobarkan?

- Bixiyayaashu waxay isticmaali karaan daaqada "[Find Training \(Hel Tobobar\)](#)" ee MERIT. Tobobarkan waxaa bixiyaha deegaamada Ogaanshaha Daryeelka Ilmaha ee Washington (Child Care Aware of Washington) iyo Hay'ada Imagine (Imagine Institute).
- Macluumaadka 'Sanadka 1' waxaa iminka lagu heleyaa iyada oo qayb ka ah wajiga tijaabada. Helitaanka gobolka oo dhan ee macluumaadka 'Sanadka 1' waxa ay noqonaysaa Janaayo 2021.

Sidee ayaan u geli karaa tobobarkan?

- EQEL waxaa lagu bixin doonaa macalin toos ah oo ku bixin doona madal online ah oo maqal iyo muuqaal ah. Bixiyayaashu waxay isticmaali karaan daaqada "[Find Training \(Hel Tobobar\)](#)" ee MERIT si ay u helaan ikhtiyaarkan.
- Tobobarka foolka-foolka ah waxaa lagu heli doonaa tilmaamaha caafimaadka ee ay bixiyaan maamulka caafimaadka deegaanka, Waaxda Gobolka Washington ee Caafimaadka iyo Xafiiska Badhasaabka.
- Nuqulka online ah ee EQEL 'Sanadka 1' waxaana lagu heli karaa [Daaqada Tobobarka DCYF](#) ee Dayrta 2021.

Yaa dhamaystay tobobarkan?

- Bixiyayaasha waxbarashada hore ee la shaqaalaysiiyay wixii ka danbeeyay Agoosto 1, 2019, ee ahna kaaliya macalinka, macalinka hogaamiyaha ah, guriga qoyska liisanka haysta, kormeeraha barnaamijka iyo maamulaha xarunta waa inay dhamaystirtaan tobobarkan.

Taxanaha Webinarka Dayrta



Taxanaha Webinarka Dayrta waxa diirada lagu saari doonaa Qorshayaasha Hormarka Xirfadlaha iyo macluumaadka ugu danbeeya ee MERIT.

Macluumaadka taxanaha ah iyo faahfaahinta is duwaan gelinta hoose.

Webinarka-ka Noofember: S&J ee PDP

Miyaad u heshey fursad aad ugu biirayso webinar-ka Oktoobar ee ku saabsan Qorshaha Hormarka Xirfadlaha (Professional Development Plan, PDP)? Miyaad weli haysaa su'aalo ku saabsan PDP?

Intii lagu jiray webinar-ka Noofemver, kooxda Hormarka Xirfadlaha waxa ay ka jawaabi doonaan su'aalaha caamka ah ee la iska waydiiyo PDP iyo buuxinta shaqaalaha ee shuruudaha.

Hadii aanad ka qayb geli karin webinarka Oktoobar laakiin aad doonayso inaad soo gudbiso su'aal si loogaga jawaabo webinarka, fadlan waxa aad iimeel u dirtaa [kooxdeena MERIT](#).



Talaata, Noofember 17 | 6 galabnimo.

[Halkan Iska Diiwaangelin](#)

Webinar-ka Diseember: Macluumaadka ugu danbeeya ee Duwaanka Shaqaalaha, MERIT



Miyaad maqashay? Macluumaad cusub iyo waxyaabaha ku jira duwaanka shaqaalaha ee soo socda, [MERIT!](#)

MERIT waxaa weeye agab wayn oo lagula soconayo hormarka xirfadaha iyo shahaadooyinka shaqaalaha.

Macluumaadka cusub waxaa kamid noqon doona tibaaxa fudud iyo in laga sii wanaajiyo nashqada si ay uga caawiso la socodka hormarkaaga. La soco wixii macluumaad dheeraad ah oo yayna ku dhaafin!

Talaata, Diseember. 15 | 6 galabnimo.

[Halkan Iska Diiwaangelin](#)

Miyaad ka maqnayd Webinar?

Webinaaro la duubay, waxaa kamid ah sameeyaha wakhtiga, waxaana laga heli karaa [boga Wargeysyada iyo Webinarada](#). Eeg iyaga!



Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada

DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada hore.

Si loola socdo barnaamijyadan iyo waxbarashada kale khayraadka ah, booqo [boga Waxbarashada iyo Deeqaha Waxbarashada DCYF](#).



Barnaamijyada Lagu Maalgeliyo Deeqaha Waxbarashada DCYF



Ma waxaad is waydiinaysaa barnaamijka waxbarashada ee buuxinaya u shuruudaha liisanka shaqalaha?

Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Maalgeliya ee [DCYF](#) waxaa lagu sheegey barnaamijyada waxbarashada, shahaadada iyo dhibcaha waaxdu taqaan, oo ay ku jiraan u qalanka deeqda lacagta DCYF, si ay uga caawiso buuxinta shuruudaha shaqaalaha.

Deeqaha Waxbarashada Early Achievers, Sheeqooyinka Guulaha

Pierce College

Lacagta Early Achievers waxaa uu bixin doonaa taageerada iyo dhiiri gelinta ardayda inta lagu jiro safmarka COVID-19.

Xarunta Xidhiidhka kuuliyada waxa ay ka taageertaa ardayga guusha iyo dhamaystirka wakhtiga arday badan ay waayeen rabitaankii maadaama oo ay qabaan warwar iyo walaac ku saabsan caafimaadka iyo xasiloonaada qoyska.

Xagaaga 2020, inta lagu jiro safmarka, waxa aanu u dabaal dagaynaa guusha dhamaystirka digriiga Ururka ECE ee Sayniska La Dabaqay oo todobaatan arday ah. Todobaatanka arday, sadex kamid ah iminka waxay ku jiraan Shahaadada Baajolaarka Saymiska la Dabaqay ee Dhigista (Bachelors of Applied Science in Teaching, BAS-T) barnaamijka ah ee Pierce.

Sidoo kale, laba arday ayaa heley shahaadooyinka Gaaban ee ECE sidoo kale hal arday ayaa heley shaqaalaha Gobolka ECE.



Kuuliyada Skagit Valley



Evelyn Gaffney iyo ninkeeda Dennis Gaffney waxay qaadanayaan Shahaadada Gaaban maadaama oo ay jirto lacagta Early Achievers. Kuubankan waxaa wax lagaga qaadan karaa Susan M. Edwards-Wilbur Early Education Center, oo u shaqaysa Bulshooyinka Qabaa'ilka Hindida Swinomish (Swinomish Indian Tribal Community).

"Waxa aan kaaga mahadnaqaynaa deeqda Early Achievers... Faa'idada wanaagsan ama faa'ido daro ee ay inuu leedahay maadaama oo aan marka horeba shaqayno si markaa aanu ugu dabaqi karno isla markaba, fikirada kala duwan, khidadaha iyo aragtiyada, waxay ina siinaysaa fahan dhaama oo caruurta oo waxaan la wadaagi karnaa taas shaqaalaha aanu wada shaqayno," ayay tidhi Evelyn.

Kuubonkan waxaa weeye mid laga soo reebey hadii ay doortaan inay ka shaqeeyaan waxbarashada hore kadib Dennis marka uu ka hawl gabo ciidamada.

Rabitaankooda u shaqaynta caruurta iyo qoysaska ayaa shaqada u horseeday, oo waxay ka faa'idaysanayaan dhamaan aqoonta ay ka bartaan Kuuliyada Skagit Valley.



Kuuliyada Olympic



"Lacagta Early Achievers ee Gobolka Washington waxa ay iiga dhigan tahay wax ka badan waxa aan sheegi karo. Markii aan heley lacagtaas, waxaa ii suurto gashay in aan hormar ka gaadho waxbarashadayda taas oo aan sida kale iigu suurto gasheen. Waxa aan dhinacyo badan ka bartay waxbarashada caruurnimada hore taas oo ii horseeday in aan wax ku dhax baro bulshada. Dhinac kasta oo lacagtan ah, laga bilaabo taageerada Kuuliyada Olympic ee shuruudaha maalin kasta waxay keentay in aan guul ka gaadho yoolashayda waxbarashada."

- Patricia Stewart, Qaadaha Lacagta EAG iyo Arday



Christ Lutheran Xarunta Daryeelka Ilmuhu waxay kamid ahayd deeqda lacagta Early Achievers ee Kuuliyada Olympic sanado badan.

Wakhti dheer kadib, deeqdu waxay siisay fursado dhawr shaqaale, kuwaas oo aan si kale ku galeen kuuliyada, inay yeeshaan mihnad guul ah oo Waxbarashada Caruurnimada Hore ah. Waxa ay ku hagtay oo ay u diyaarisay bulshadeena inay bixiso waxbarasho tayo saraysa oo dhalinyarta aageena ah.

Deeqdu uma sahlayo shaqaalaha inay waxbartaan, waxa ay bartaa inay noqdaan xirfadle oo ay si anshax leh u shaqeeyaan..

- Shawna Patrick, Maamulaha Christ Lutheran Xarunta Daryeelka Ilmaha

Shaqaalaha Martha iyo Mary Kids Center oo ku sugan Kuuliyada Olympic

Deeqda Early Achievers waxa ay si wayn ugu faa'idaysay shaqaalaheena. Deeqdu waxay u ogolaatay dadka ka shaqeeya mihnada waxbarashada hore inay u bixiyaan si dhaanta sayska hogaamiyayaasha mustaqbalka. In shaqaalaheena lagu celiyo dugsiga waxay ku keentay farxad xarunta.

Fasalka kadib, shaqaaluhu waxay is raacayaan si ay u arkaan sida ay u isku waafajinayaan waxa ay barten iyo fasaladooda. Waxaa jirta kor u qaad shakhsiga ah, fasalada iyo xarunta marka ay dadku doonayaan oo ay ku faraxsan yihiin inay helaan aqoon dheeraad ah.





Waxa aanu shaqaalaysiinay dad ka kala socda meelo badan oo nolosha ah oo meelo badan kasoo kala jeeda. In la awoodo in la siiyo fursad ay u galayaan dugsiiga in laga caawiyo inay dareemaan xasilooni iyo guusha mihnada waxbarashada hore ee ay doorteen, taas oo markaana ka muuqanaysa caruurta iyo qoysaska aanu u shaqayno. Waxa aan weligay ka mahadnaqayaa fursada iyo guusha deeqda Early Achievers lacagteedu ay siisay bulshadeena iyo xarunteena.

- Haley Kunka, Maamulaha Xarunta Martha & Mary Kids

Hooyo shaqaysa oo dhashay afar wiil ahaan, maalmihii lasoo dhaafay, deeqdu waxa ay gacan wayn ka gaysatay digriigayga ECE.

Aniga ka shaqaysaa 35+ saacadood todobaadkii xarunta daryeelka ilmaha igumay filnayn lacagtaydu in aan dhigto fasalada kuuliyada. Lacagtu waxay i siisay fursad aan ku koriyo mihnadayda, xataa aniga oo dakhli joogto ah ka hela taageerada ilmaha.

Dadka qaar ayaa u arka in daryeelka shaqaaluhu ay ilaaliyaan caruurta oo ay buuxiyaan baahiyahooda aas aasiga ah. Waa dhab, laakiin way ka badan tahay.

Habdhaqanka qalafsan, dib u dhaca korniinka, shirarka waalidka, la socodka korniinka caruurta ku jira daryeelka, daryeelka shaqaalaha maadaama oo aad joogto "mashraxa" maalinta oo dhan, ula hadalka caruurta si wanaagsan, halka ay ka noqon lahayd: maya, ha samaynin, jooji taas, fadhiiso; ma fududa in la sameeyo marka aanad haysan saynis ka danbeeya oo sababta ay muhiim ugu tahay ah da'dan. Waxaa jira dhawr wax oo ay tahay in laga boodo. Fasalada ECE waxa ay kaa caawinaysaa inaad wax kasta aragti ka yeelato.



Lagaagama baahna inaad jeclaato oo aad fahanto caruurta. Qaybta xiisaha leh ee laga helo xirfadle nimadayda. Waxa aan ognahay in lacag ka badan aad ka heli karto hadii aad ka shaqayso cuntooyinka markaa la sameeyo ama maqaaxiyaha, laakiin miyaad badali kartaa nolosha ilme? Ama xubin koox oo leh qoyska ay ku adag tahay inuu koriyo ilmihisa?

Dadkeena ku jira mihnada shaqada daryeelka ilmaha way ogyihiin inay tani adag tahay, laakiin waxaa weeye meesha ugu wanaagsan ee isbadal lagu keeni karo noloshooda ah.

- Berni Booher-Thacker, Kormeeraha Barnaamijka Martha & Mary Kids



Wadaag Sheekadaada!

Miyaad heshey lacag Early Achievers ah oo ma doonaysaa inaad wadaagto sheekadaada? Waxa aad sheekadaada u dirtaa Khabiirka Waxbarashadeena ECE, [Sharene Leek](#), si loogu daro wargeyska soo socda.

Waxa aad sidoo kale u diri kartaa sheekadaada kuuliyada Deeqda Lacagta Early Achievers ee Point of Contact. Si aad u hesho Point of Contact, booqo [Daaqada Mihnada ECE](#).

Khayraadka COVID-19 ee Shaqaalaha ECE

Cuntada Caafimaadka Qabta ee WIC iyo Kuwa Kale Oo Badan



[Barnaamijka Nafaqada Dumarka, Sabiyada iyo Caruurta \(Women, Infants, and Children, WIC\)](#) waxa uu siiyaa qoysaska nafaqo cunto oo waxa uu siiyaa shaybaadhka caafimaadka, qiimaynta khatarta, waxbarashada nafaqada, taageerada naas nuujinta iyo tixraaca adeegyada caafimaadka iyo bulshada.

Barnaamijku waxa uu bixiyaa adeegyada daruuriga ah ee dadka uurka leh, hooyooyinka cusub ee naaska nuujinaya, sabiyada iyo caruurta ka yar 5 jirka. Dadka uurka leh badankood iyo caruurta yaryar ee ku jirta Medicaid ama Basic Food Kaalmada Naqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program, SNAP) ayaa u qalma adeegyada WIC.

Si aad u buuxiso baahiyaha qoysaska inta lagu jiro safmarka waxaa jiray isbadal muhiim ah oo barnaamijka ah:

- Ikhtiyaarada wada sheekeysiga taleefanka ama maqal iyo muuqaalka ah waxaa laga heli karaa barnaamijyo cusub iyo khayraadka waxbarashada.
- WIC waxay balaadhisay ikhtiyaarada cuntada si ay ugu sahasho iibsiga iyada oo la isticmaalayo gunooyinka WIC.
- Dadka ka qayb galayaa waxay iminka iibsanayaan cuntooyinka WIC iyada oo isticmaalaya kaadhka WIC, kaas oo tukaamaysiga fududeeyaya.
- [WICShopper app](#) waxa ay sidoo kale fududeeyeen tukaamaysiga, oo sidoo kale waxay bixiyaan risiidhada iyo tilmaamo waalidnimo. Wax ka badan 90% qoysaska Washington WIC waxaa ay ku isticmaalaan WICShopper app.

Marka la eego saamaynta dhaqaale ee COVID-19, dadku waxay doonan karaan adeegyada WIC marka kowaad. WIC waxay awood u leedahay qaabilaada oo ay waxay soo dhawaynaysaa qoysaska cusub.



Si aad uga heshid adeegyada WIC aagaaga:

- Fariin qoraal ah u dir oo ah "WIC" 96859
- Booqo [ParentHelp123's Resource Finder](#)
- Kala Hadla Khadka Tooska ah ee Help Me Grow WA 1-800-322-2588



Fasalo COVID-19 ah oo Online ah oo Bilaash ah oo Daryeel Bixiyayaasha Caruurta ah



Degmada Caafimaadka Snohomish waxay bixinaysaa adeega caafimaadka shacabka ee bulshada daryeelka ilmaha oo waxa ay bixinaysaa saacada Adeegyada (1.0 STARS dhibcaha ah) oo bilaash ah mudo kooban.

Waxaa lagu soo qaadanayaa?

- Sida uu fayrasku u faafo iyo qaabka loo xakamayn karo.
- Tilmaamaha lagu xadidayo faafitaanka xarunta daryeelka ilmaha, daryeelka ilmaha guriga qoyska iyo barnaamijyada daryeelka caruurta da'ada waxbarashada gaadhay.
- Waxa aad naqdidaa macluumaadka ugu danbeeya ee lagula shaqaynayo hawlaha daryeelka ilmaha maalin kasta iyada lakala fogaanayo oo nadaafadana lagu dadaalayo.
- Maxaa la samaynayaa hadii uu jiro kiis COVID-19 ah oo la xidhiidha daryeelka ilmaha.
- Khayraadka guud iyo gaarka ah ee COVID-19 ee daryeelka ilmaha.

Macluumaadka & Isduwaangelinta Halkan

Su'aal? Iimeel u dir Degmada Caafimaadka Snohomish [Barnaamijka Wacyi Gelinta Caafimaadka Daryeelka Ilmaha \(Child Care Health Outreach Program\)](#) ama la hadalka 425.252.5415.

Nidaamka Kor u Qaadida Caafimaadka Inta Lagu Jiro COVID-19

Daabacaadan waxaa lagu sheegayaa nidaamka ugu wanaagsan ee bulshada daryeelka ilmaha wakhtiga cuntada iyo nususaacaha, iyada oo weli la raacayo tilmaamaha Xarunta Xakayanta iyo Kahortaga Xanuunada (Centers for Disease Control and Prevention, CDC) iyo Waaxda Gobolka Washington ee Caafimaadka (Washington State Department of Health, DOH).

Daabacaadan waxaa lagu heli karaa: [Ingiriisi](#), [Isbaanish](#) iyo [Somali](#).

Daabacaadan, sidoo kale waxa ay noqon kartaa khayraad waxbarasho, waxaana laga heli karaa [Websaytka COVID-19-ka DOH](#) ee [Agabka Waxbarashada](#).



Wixii su'aalo ama macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan khayraadkan, la xidhiidh [Chris Mornick](#).

Joogto Ugu Xidhnaw

Waxaa jira dhawr dariiqo oo aad kula xidhiidhayso dhamaan waxa aad u baahan tahay ee la xidhiidha Xirfadlaha Waxabrahada iyo tobobarka.

- Kaydso [boga Hormarka Xirfada](#).



Isku Duwaan Geli Wergeyskeena

Korinta Shaqaalaha, waxaa weeye khayraadka dhamaan shakhsiyaadka shaqeyaa ee bixiya taageerooyinka waxbarashada xirfadlaha ee shaqaalaha waxbarashada hore.

Wargeysa PD waxaa loogu telo geley in uu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqooyinka Hormarka Xirfadlaha ah.

Eeg Iyaga

Liiska dhamaystiran ee wargeysa waxaa laga heli karaa [boga Wargeysa iyo Webinarka](#). Si aad isku duwaan geliso, iimeel u dir [Marlene White](#).



Fariin ka socota Xogyahaha DCYF




Xog Hayaha DCYF Ross Hunter waxay la wadaagi doontaa fariimaha bishii bixiyayaasha ee macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo [waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).

- [Wargeyska Oktoobar](#)
- [Wargeyska Diisambar](#)
- [Wargeyska Julaay](#)

Hadii aad heyso wax suaal ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiska Xidhiidhada](#).

Coronavirus - Macluumaadkiisii Ugu Danbeeyay ee COVID-19

DCYF waxa ay leedahay websayt u gaar ah [Macluumaadka Ugu Danbeeya ee COVID-19](#).



Wax ra'yi ah!



Fadlan noo sheeg sida aanu wax u wadno adiga oo galaya [xog uruurintan kooban](#).

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiiinayo mawduuc waxa aad la xidhiidhaa [Marlene White](#).